# Xeer ku saabsan sharciyada iskoolka dugsiyada sare ee gobolkaTelemark

Maamulka: Waxaa aasaasay Golaha Deegaanka Telemark 10 kii Diseembar 2024 kuna salaysan sharciga 9 Juun 2023 nambarka 30 oo ku saabsan waxbarashada dugsiga dhexe iyo sare (Xeerka waxbarashada) § 10-7.

**§ 1.Ujeedo**

Ujeedada sharciyada dugsiga ee degmada Telemark waa:

1. In ay ka qayb qaataan dhamaan ardayda horumarinta aqoonta, xirfadaha iyo hab-dhaqanka si ay awood ugu yeeshaan inay horumariyaan noloshooda iyo inay awood u yeeshaan inay ka qayb qaataan shaqada iyo bulshada dhexdeeda.
2. in la siiyo qaab-dhismeed cad oo kor u qaadaya nidaamka iyo hab-dhaqanka wanaagsan, iyo jawi waxbarasho oo ammaan ah oo wanaagsan

3. in la siiyo ardayda warbixino ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka, iyo cunaqabaha iyo xeerarka habraaca lagu dabaqo marka ardaygu jebiyo xeerarka
4.In uu noqdo mid tilmaan u ah qiimaynta nidaamka iyo hab-dhaqanka, cunaqabataynta lagu soo rogi doono iyo in dhammaan ardayda loola dhaqmo si siman.

**§ 2. Meelaha uu khuseeyo**

Sharciyada iskoolku waxay khuseeyaan dhammaan ardayda dhigata dugsiyada sare ee dawladda ee gobolka Telemark.
Xeerarku waxay khuseeyaan saacadaha dugsiga, dhulka dugsiga, jidka dugsiga, agagaarka dugsiga, dalxiisyada, safarrada dugsiga, nashaadyada iyo xafladaha uu abaabulo dugsigu, iyo sidoo kale marka ardaydu dhigtaan goobaha shaqada ama tababar xirfadeed (YFF) ee shirkadaha.

Xeerarka ayaa sidoo kale khuseeya cayda iyo xadgudubyada kale ee ka dhaca meel ka baxsan dhismaha iskoolka, waddada iskoolka, saacadaha iskoolka ka baxsan, iyo marka la isticmaalayo dhijitaalka . Kordhintu waxay khusaysaa marka falku xidhiidh cad la yeesho deegaanka iskoolka taas oo ficilku ka dhashay xaalada iskoolka xiriir la leh.

# § 3. Nidaamka dimuqraadiyadda iskoolka

Iskoolku waa inuu u diyaariyaa arday kasta si uu u awoodo inuu ra'yigiisa si xor ah u cabbiro oo uu ku dhiirigeliyo inay ka qaybqaataan dimuqraadiyadda iskoolka. Iskoolku waa inuu ardayda ka caawiyaa shaqadooda xagga dimuqraadiyadda iskoolka.

**Gudida ardayda**

Dugsiyada sare ee Telemark waa in ay yeeshaan guddi arday oo ay doortaan ardaydu. Ardeydu laftoodu waxay go'aamiyaan tirada golaha ardayda.

Golaha ardaydu waa hay'ad la-talin ah oo xaq u leh inay ka hadlaan dhammaan arrimaha khuseeya dugsiga.  Guddiga ardaydu awood uma laha inay go'aan gaadhaan. Guddiga ardaydu waa in uu ka shaqeeyo jawiga waxbarashada, xaaladaha shaqada iyo danaha daryeelka waxaangsan ee ardayda.

**Gudida dugsiga**

Dhammaan dugsiyada sare ee Telemark waa inay lahaadaan guddi dugsi oo u shaqayn doona sidii hay'ad la-talin u ah maamulaha dugsiga. Guddiga dugsigu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka hadlo arrimaha dugsiga.

Guddiga dugsigu wuxuu ka kooban yahay maamulaha dugsiga, wakiillo ka socda ardayda, wakiillo ka socda shaqaalaha iyo wakiil ka socda mulkiilaha dugsiga. Ardaydu waa inay ahaadaan kuwa ugu badan.

## § 4. Hab dhaqanka

Ardaydu waa in uu dhakso u yimaadaa, muujiyaan caadooyin shaqo oo wanaagsan iyo dadaal shaqo oo wanaagsan. Waa ku-dhaqan wanaagsan in:

1. Timaado adoo soo diyaar ah, si firfircoon uga qayb qaadato waxbarashada
2. Qabo shaqadii laguu diray sida ugu fiican iyo wakhtiga saxda ah

3. ogeysii dugsiga/shirkadda (YFF/goobta tababarka) sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah haddii ay dhacdo maqnaansho
4. Cadee maqnaanshaha si waafaqsan nidaamka maqnaanshaha ee hadda jira
5. Ha kuu hagaagsanaadeen soona qaado  wixii aad wax ku baran lahayd iyo qalabka waxbarshada ee lagama maarmaanka ah
6. Waa in Moobilka codka lago xiro oo aan la arag inta uu waxbarashadu socdo, haddii aan si kale loola heshiin macalinka
7. raac xeerarka amniga iyo badbaadada isticmaalna dharka shaqada iyo qalabka ilaalinta ee looga baahan yahay manhajka waxbarashada  ama kuwa  ay khasabka tahay.

8. Hagaaji markaad isticmaasho dugsiga/shirkadda (YFF/goobta tababarka) aagagga iyo maqaayada

9. Raac milkiilaha dugsiga iyo sharraxaadaha hab-nidaameedka ee dugsiga, sida looga hadlay § 9-3

**§ 5. Hab-dhaqanka**

Ardaydu waa inay ka qaybqaataan abuurista jawi dugsi oo wanaagsan iyagoo u dhaqmaya si xushmad iyo ixtiraam leh, oo ay muujiyaan akhlaaq wanaagsan.

Waa dhaqan wanaagsan in:

1. Gacan ka gesashada xasiloonida marka ardaydu xiisada ku jirto
2. Raac  tilmaamaha macalinka iyo shaqaalaha kale
3. Ha loola dhaqmo hantida dugsiga iyo tan  dadka kaleba si xilkasnimo leh

Lama ogola in:

1. La adeegso luqad xun, cagajugleyn ama ku xad-gudub dadka kale jir ahaan, hadal ahaan ama dhijitaal ahaan,aad samayso rabshad ama hanjabaad
2. La isticmaalo taleefoonada gacanta ama qalabka kale ee elegtarooniga ah marka aad waxbarashada ku jirto, iyada oo aan taas loo caddayn macalinka
3. In aad qaado ama adeegso sawiro, filimaan ama cajalado maqal ah oo ardayda saaxiibada ah, macalimiinta, shaqaalaha ama kuwa kale iyaga oo aan ogolayn
4. soo dejiso ama aad faafiso ama elektaroonig ahaan; sawir qaawan, cunsuriyad ama waxyaabo kale oo meel ka dhac ah ama sharci darro ah
5. In aad khamaar lacag ah ku ciyaarto dugsiga
6. In aad isticmaashid ama haysashada tubaakada, buuriga, sigaarka elektaroonigga ah, khamriga, daroogooyinka, daroogooyinka kale ama daawooyinka maanka dooriya
7. In aad haysayo walxo khatar ah ama hub

8. khiyaameeyaan ama isku daydaan in ay khiyaameeysaan imtixaanada ama soo gudbinta adiga oo caawimaad ka helaya kuwa kale, siinaya caawimo kuwa kale ama isticmaalaya qalab aan la ogoley
9. In aad soo xerayso ama soo bandhigo wax soo saar kuu gaar ah; qoraalo, wax aad ka soo shaqaysay iyo wixii la mid oo ay dad kale ka soo shaqeeyeen, oo ay ku jiraan qoraallo  laga soo dejiyey internetka.
10. In aad xidhato dhar ka hortagaya wada hadalka ama aqoonsiga xaaladaha waxbarashada

Haddi shirkadu (YFF/goobta tababarka) ay leedahay hab-raac iyo hab-dhaqan u gaar ah, waa in kuwaas la raaco.

## § 6. Tilaabooyinka wax ka qabad hadii la jebiyo xeerka dugsiga

Ardeyda jebiya nidaamka dugsiga, cutubka 4 iyo/ama 5, waxaa laga yaabaa in lagu soo rogo ganaax.

Cunaqabatayntu waxay  ahaanaysaa mid macquul ah oo la mid ah hadba xeerarka ardayga jebiyey, halkaas oo loo fiirinayo hadba inta ay gaarsiisan tahay iyo ku celcelinta ay muhiim u yihiin hadba nooca la dooranayo doorashada ganaaxa.
Ardayga waxaa waajib ku ah inuu u hogaansamo ganaaxa uu dugsigu go'aamiyey. Haddii ay dhacdo in uu u hoggaansami waayo waxaa la saari karaa ganaax cusub .

Lama ogola in koox si wada jir ah loogu ciqaabo wax uu hal arday geystey.

*§ 6-1.* ***Ganaaxa guud***

Ganaxa guud baa lagu soo rogi karaa hal mar ama in ka badan hadii la jebiyo xeerarka dugsiga. Ganaaxa waa in ardayga lala socodsiiyaa oo lana diiwaan geliyaa sababta. Ardayga waxaa lagu soo rogo karaa hal ama in ka badan ganaaxyo guud:

1. In lala hadlo
2. In la qoro khaladaadka aad samaysay
3. In hoos loo dhigo darajada imtaxaanka teeramka,hab-dhaqankaaga
4. In ardayga laga qaado shay ama mandooriye
5. Hadii ay soo noq-noqoto isticmaalka taleefnaka iyada oo aadan ogolaansho haysan,waxaa lagaaga qaadi karaa si kumeelgaar ah.
6. haddii ay dhacdo dhacdo halis ah oo la xiriirta isticmaalka moobilka (fidinta sawirada, cagajuglaynta iwm)waxaa si ku meel gaar ah lagaaga qaadi karaa moobilka.
7. In aad qabato hawlaha laguu xilsaaray iyo/ama hagaajinta waxyeelada ama dhaawaca uu ardaygu geystey tusaale ahaan; uu dhaqo, ama uu ka qaado meel alaabo taalo.
8. In lagugu amro in aad joogto/timaado kulamo/shirarwaqtiga iskoolka iyo waqtiga ka baxsanba,tusaale ahaan shirka gududa khilaafaadka.

9.In lagaa xadido in aad isticmaashid qalab/wershed/qol gaar ah

10. Ka saarida fasalka/kooxda inta ka dhiman fadhiga tababarka, oo ku kooban laba saacadood, marka macalinku go'aansado

*§ 6-2. Ganaax gaar ah*

Ganaax gaar ah waa go'aanno gaar ah, waxaana lagu soo rogi karaa ka dib khatar weyn oo gaar ah oo halis ah ama  xeerka dugsiga oo marar badan oo soo noqnoqda la jebiyo. Tusaalooyinka waxay noqon karaan rabshad, dhibaatayn, haysashada hub ama daroogo, khiyaamo ama been abuur.

Kahor intaanan ganaaxa gaarka ah la qiimeyn oo go'aan laga gaarin, ardayga waa in la siiyaa fursad uu ku hadlo. Maamulaha dugsiga waa inuu u soo bandhigaa ardayga inuu soo ka xaysan karo  qof wada hadalaka. Masuulka ardayda ka yar 18 sano waa in la ogeysiiyaa mar kasta.

Ganaaxa gaarka ah waa in uu ahaadaa qoraal, la sababayo oo loo sheego xaqa uu ardaygu u leeyahay in uu racfaan qaato. Ardaygu wuxuu  xaq u leeyahay in lagu hago xuquuqdiisa in uu kiiska qayb ka yahay, iyo sida uu u soo gudbisan karo cabashadiisa.

Intaan go'aan ka eryid ah la gaarin,waa in tijaabooyin wax qabad la samayo iyo in lana qiimayo ganaax fudud.

Ardayga waxaa lagu soo rogi  karaa ganaax hal ama ka badan oo  gaar ah

1. In hoos loo dhigi dhibcaha nidaamka ama hab-dhaqanaka
2. ka saarida dugsiga/shirkadda (YFF/goobta tababarka) inta ka hadhsan maalinta dugsiga kadib go'aanka maamulaha
3. Ka eryida dugsi hal maalin ilaa iyo shan maalmood ka dib go'aanka maamulaha dugsiga
4. ceyrinta inta ka dhiman sanad dugsiyeedka ka dib go'aan ka soo baxay maamulka gobolka ee madaxa waxbarashada, caafimaadka dadweynaha iyo caafimaadka ilkaha
5. In booska dugsiga loo beddelo waxbarasha ka duwan ka dib go'aan ka soo baxay maamulka gobolka ee madaxa waxbarashada, caafimaadka dadweynaha iyo caafimaadka ilkaha.

*§ 6-3. Hayada cabashada*

Maamulka gobolka, ama maamulka gobolka ayaa awoodda siisay, hay'adda rafcaanka ee go'aannada shakhsi ahaaneed ee ganaaxa gaarka ah, jf § 6-2.  .

**§ 7.** Xuquuqda ardayga

*§ 7-1.* Badbaado iyo jawi waxbarasho oo wanaagsan

Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay helaan deegaan waxbarasho oo ammaan ah oo wanaagsan**.**

Dugsigu waa in uu si firfircoon oo habaysan u shaqeeyaa si uu u horumariyo deegaan wanaagsan oo cilmi nafsiyeed, halkaas oo ardaygu

uu la kulmi karo xasilooni maskaxeed, ammaan iyo bulso uu qayb ka yahay.

Dugsigu uma dulqaadanayo  wixii la xiriira xadgudubyada sida cagajuglaynta, rabshadaha, takoorka iyo dhibaataynta, waana inuu leeyahay nidaamyo cad oo lagu maareeyo arrimahan oo kale**.**

*§ 7-2. Xuquuqda ardayga*

*Ardaydu waxay xaq u leeyahay*

1. in loola dhaqmo si xushmad, ixtiraam iyo tixgalin leh
2. Waxbarashada dugsiga sare si waafaqsan sharciga waxbarashada oo leh xeerar, manhajka hadda jira iyo go'aamada maamulka gobolka
3. Waxbaris ku haboon isyaga kartidooda iyo waxa laga fili karo
4. Ka qayb qaadashada qorsheynta iyo fulinta shaqada si loo helo jawi dugsi oo ammaan ah oo wanaagsan
5. In la ogaado ujeedooyinka waxbarashada iyo waxa xoogga lagu saaray qiimaynta kartida
6. In uu si firfircoon uga qayb qaato qiimaynta shaqadiisa, kartidiisa iyo kobcinta maado
7. Qiimayn joogta ah iyo tan ugu dambeeya ee maadooyinka, nidaaamka iyo hab-dhaqanka. Qiimaynta joogtada ah waa in loo bixiyaa si joogto ah oo habaysan waxayna noqon kartaa mid hadal ah iyo mid qoraal ah
8. In wada hadal lagaga warbixinayo ardayga macalinku la yeesho waalidka ugu yaraan lixdii biloodba hal mar,qoraalna laga qoro

9. Talooyinka lagama maarmaanka ah ee ku salaysan baahidaada, waxbarashada, shaqada iyo doorashada xirfadeed, iyo xaaladaha shakhsi iyo bulsho
10. In loogu digo qaab qoraala ah oo aan sabab lahayn,hadii ay jirto

A. Hadii looga shakiyo in ardaygu heli karo dhibco maado qiimaynta lix biloodka ah ama sanadlaha
B. Khatar la xiriirta in dhibco lagaa dhimo dhanka nidaamka iyo hab-dhaqanka lixi biloodka ama sanadlahaba

11. Dugsigu wuxuu wada shaqayn la leeyahay waalidka ardayga

*§ 7-3. Xaq u yeelashada  digista*

Ku guuldareysiga ilaalinta xuquuqda sida ku cad cutubkan waa in lagu wargeliyaa dugsiga, hayada u dooda dadka lagu xadgudbey ama guddiga ardayda.

*§ 7-4.* Qiimaynta nidaamka iyo hab-dhaqanka

Qiimaynta nidaamka iyo hab-dhaqanka waa in lagu xidhaa oo kaliya ilaa heerka uu ardaygu u dhaqmo si waafaqsan xeerarka dugsiga, waana in ka baxsan tahay qiimaynta aqoonta ardayga ee maadooyinka.

**§ 8 Waajibaadka ardayga**

*§ 8-1. Maqnaanshaha iyo imaatinka*

Ardaydu waa inay joogaan inta lagu jiro waxbarashada hadii aan si kale loogu heshiin dugsiga

. Maqnaanshaha oo dhan waa la diiwaangeliyaa haday noqoto maalin ama saacadba

Ardayda soo daahda waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb qaataan waxbarashada.

- Imaanshaha ilaa iyo 15 daqiiqo ka dib marka uu waxbarashadu bilaabanto iyada oo aan sabab la diwangelin waxa loo diwaan gelin doonaa sida khalad iyo soo daahis.
- Imaanshaha ka badan 15 daqiiqo kadib marka waxbarashadu bilaabato iyada oo aan sabab cadayn ah la keeniin,waxaa sidoo kale loo diiwanaan gelinaayaa maqnaansho

Ardaygu waa in uu sida ugu dhaqsaha badan ugu soo sheegaa dugsiga/shirkadda (YFF)/ goobta shaqada haddii uu jiro xanuun ama sababo kale oo maqnaansho ah. Tani waxay sidoo kale khuseysaa haddii ardaygu uu dhexda kaga tago waxbarashada. Haddii maqnaanshahu sii socdo ardaygu waa inuu mar kale ogeysiiyaa dugsiga arrintan**.**

**§ 9. Go'aano kala duduwan**

*§ 9-1.* Mas'uuliyadda magdhowga

Ardayga waxaa laga yaabaa inuu mas'uul ka yahay waxyeelada uu gaarsiiyo dugsiga ama hantida dadka kale.

*§ 9-2. Waxyaabo ciqaab lagu mutaysan karo*

Wixii ciqaab lagu mutaysan karo  marka loo eego xeerarka dugsiga, jf. § 2, waxaa loo sheegi doonaa booliiska.

*§ 9-3. Hab-raaca sharaxaadeed oo kale*

*Cida dugsiga iska leh waxay ka shaqayeen  hab-raacyo u gaar ah:*

- *Xeerka imtixaanka*
- Dalxiisyo/safarro dugsi
- Maareynta maqnaanshaha
- Khiyaanada iyo been-abuurka
- Hababka caadiga ah – sakhradda

Dugsiga sare oo gaar ah ayaa samaysan kara nidaam sharraxaadeed  u gaar ah sida:

- Maqaayad
- Baarkinka
- Isticmaalka qalabka/aqoon-is-weydaarsiga/qol gaar ah
- Caafimaadka, deegaanka iyo badbaadada
- Dalxiisyo/safarro dugsi

# § 10. Dhaqangelinta

Xeerku wuxuu dhaqan galayaa 20.01.2025**.**